WARBIXINTA KOOBAN:

# Awoodaha Soomaalida ee wax ka qabashada dhibaatooyinka ayaa isbedelaysa; sidee bay uga jawaabayaan hawlwadeenada bini'aadantinimo?



United Kingdom Humanitarian Innovation Hub

Humanitarian Outcomes

## Warbixin kooban

Dhibaatadii bini'aadantinimo ee ugu dambeysay ee Soomaaliya (2022-23) waxay ahayd mid aad u daran, iyadoo ay dhacday roob yari aan hore loo arag taasoo keentay dhibaato baahsan iyo dhimasho xad dhaaf ah oo aad u badan.[1] Sababaha keena xaaladaha macluusha u dhaw – abaaraha, colaadaha, iyo dawladnimada jilicsan – waxay la mid ahaayeen dhibaatooyinkii hore ee 2011 iyo 2017; laakiin bulshada Soomaaliyeed wax badan baa iska beddelay, dhibaataduna wey ka dabacsaneyd sidii markii hore laga cabsi qabay in aay noqoto. Inkastoo jawaabta bini'aadantinimo ay ku bilaabatay si tartiib tartiib ah hadana waxay u korodhay si miisaan leh, iyadoo tabarucaadka gargaarka bini'aadantinimo uu gaaray in ka badan US$2.2 bilyan sanadka 2022 waxayna door muhiim ah ka ciyaartay wax ka qabashada baahiyaha bini'aadantinimo. Laakiin jawaabta caalamiga ah kaliya waxay ahayd qayb ka mid ah sheekada. Awoodaha ay Soomaalidu wax kaga qaban karaan dhibaatooyinka ayaa sidoo kale ahaa kuwo muhiim ah - haddana wali waa kuwo aan wax badan laga fahamsanayn. Soomaaliya inta badan waxaa dibadda laga arkayaa in ay tahay wadan doowlidnimada ku fashilmay oo hoy u ah argagixisada iyo burcad badeedda, musuqmaasuqa joogta ka yahay, una nugul macaluusha iyo dhibaatada. Laakin tobankii sano ee laga soo bilaabo macluushii 2011, awoodaha Soomaalida ee wax ka qabashada dhibaatooyinka waa aay sare martay, waxaana gargaarka caalamiga ah loo baahan yahay in uu si wax ku ool ah u taageero awoodahaas.

Dib u eegistaan oo ka koobneyd 118 wareysi oo lala yeeshay hay'adaha gargaarka gudaha iyo kuwa caalamiga ah, dowladda, dadka ganacsatada ah, aqoonyahanno iyo sidoo kale muwaadiniin Soomaaliyeed oo meelo kala duwan ka yimid – iyadoo ay weheliso xog-ururin dhanka taleefoonka ah oo ay ka qeybgaleen 760 qof – ayaa diiradda lagu saaray awoodda adkeysiga ee muwaadiniinta dalka. nidaamyada, iyo sida nidaamka bini'aadantinimo uu uga hawl galay arimahan. Dib u eegista looguma talagalin inay noqoto qiimaynta jawaab celinta bini'aadantinimo ee 2022–23. Hase yeeshe, waxay isku dayaysaa inay soo bandhigto aragti fog oo ku saabsan sida gargaarka bini'aadanimada uu si wanaagsan ula macaamili lahaa oo uu gacan uga geeysani lahaa xaaladda isbeddelka ah ee Soomaaliya si ay xaladeedu u wanaagsanaato oo aay waxyeello aad u daran uga imaanin marka la eego dardargelinta isbeddelka cimilada iyo colaadaha socda.

Natiijooyinka muhiimka ah ee dib u eegista ayaa ah sida soo socota.

### Hawl-wadeennada gargaarka ee Soomaaliya waxay bilaabeen inay ka shaqeeyaan siyaabo badan oo isku-dhafan oo isirka ku salaysan oo dhan horumarka, bini'aadantinimada, nabadda- iyo dawlad-dhisidda, laakiin weli ma haystaan aragti ah doorka ay ku leeyihiin qalalaasaha muddada dheer ee adag.

Jawaab-celinta gargaarka ee 2022–23 waxay sameeyeen isbeddello guul leh si ay si wanaagsan ula falgalaan awoodaha Soomaalida. Si kastaba ha ahaatee, ka dib sanado badan oo maalgalin bini'aadantinimo oo joogto ah oo laga fulinaayay ama ku dhowaad

US$1 bilyan sanadkii, isbedelo badan oo ku yimid habka loo gaarsiinayo gargaarka bini'aadantinimo ee dhibaatadii ugu dambeysay ayaa u muuqata inay dhacday markii jawaabtu ay bilaabatay inay sare u kacdo. Tani waxay keentay dib u dhac, in howlaha qaar si degdeg ah loo fuliyo, iyo in mararka qaarkood la sameeyo faragelin aan habboonayn.

Horumarka muhiimka ah ee laga gaaray dhibaatadii 2022–23 ayaa ahayd doorka balaadhinta ee shaqaalaha horumarinta, gaar ahaan Baanka Adduunka, oo awood u leh inuu dhaqaajiyo taageerada wax ka qabashada abaaraha. Iyadoo la aqoonsanyahay in gargaarka bini'aadantinimo ay u badan tahay in loo sii baahnaan doono tobanaanka sano ee soo socda, aragti dheer ayaa loo baahan yahay si loo hubiyo in ay gacan ka geysato dhamaystirka awoodaha dawladeed iyo bulshada rayidka ah ee sii koraya iyo in ay yaraanayso khatar kasta oo la xidhiidha, sida suurtagalnimada horseedeeyso takoorka.

1 Waxaa lagu qiyaasay 43,000, iyadoo kala bar dhimashadan ay ku dhacday caruurta da'doodu ka yar tahay 5 sano. Checchi, F. Tilmaanta saamaynta jawaabaha bini'aadantinimo ee dhimashada dadka: dhibaatooyinka habka iyo soo jeedinta. *Khilaafka iyo Caafimaadka 17, 16 (2023).* https://doi.org/10.1186/s13031-023-00516-x

## Dhaqdhaqaaqu waa furaha awoodda adkeysiga Soomaalida taas oo nidaamka gargaarka uu khalad u fahmay.

Sababta muhiimka ah ee looga fogaanayo xaaladaha macluusha baahsan waxay u muuqataa inay tahay xoogga sii kordhaya iyo adkaysiga nidaamyada Soomaalida, awoodaha, iyo wakaalada. Dhaqdhaqaaqu waa istaraatiijiyad adkeysi oo muhiim ah si loo joogteeyo loona kala duwaneeysiiyo hab-nololeedyada loona raadiyo kheyraad. Isku xirnaanshaha ka dhaxeeya miyiga iyo magaalooyinka ayaa muhiim u ah go'aannada joogida, bixista, ama soo noqoshada, wayna sii xoogeysanayaan taasoo u horseedaysa hab-nololeedyo adkeysi leh.

Dad weeynaha tillaabada qaada inta ay masiibada jirto waxay sidaas u sameeyaan sababo kala duwan oo isku dhafan – laakiin nidaamka gargaarku waxa uu u tixgaliyaa in dhaq-dhaqaaqa uu yahay inta badan istaraatiijiyad dhib iyo culays ku ah dadka raadinaya kheyraadka bini'aadantinimo. Fahamkan yar ee dhinaca dhaqdhaqaaqa iyo kala soocida adag ee dadka gudaha ku barokacay ayaa keenaya barnaamijyo aan habboonayn oo xoojinaya musuqmaasuqa iyo takoorka kordhinayana u nuglaanshaha dhibaatooyinka mustaqbalka.

Barnaamijyada la qabsiga si hab wanagsan loogu taageero dhaqdhaqa dhisa hab-nololeedyada adkeysiga leh waxay shaqayn karaan oo keliya haddii loo adeegsado hababka gargaarka bani'aadamnimada, adkeysiga iyo xalalka wadashaqaynta waara. Ururadu waxa ay isku dayayaan in ay qaataan oo ay tijaabiyaan xaaladaha faragalinta sida barnaamijyada ku salaysan goobaha waxayna tijaabinayaan hababka lagu gaarsiin karo caawimaada ayada oo loo marinaayo shabakadaha bulshada inti loogu dhiibi lahaa ama ay u gudbin lahaayeen shakhsiyaad. Laakin iyada oo aan la helin dadaal dheeri ah oo lagu hawlgelinayo dhibka barokaca ,waxaa lumaya fursado lagu heli karo barnaamijyo ka wanaagsan.

Waxaa jirta baahi xooggan oo loo qabo hawl-wadeenno gargaar si ay wax uga beddelaan sida dhaqdhaqaaqa iyo barakaca loo fahmayo, si ay tani u horseeddo in dib looga fakaro soocidda dadka gudaha ku barokacay (IDPs) iyo qaababka gargaarka ee ku salaysan xerooyinka. Hadii si fudud loo dhigo, waxaa loo baahan yahay in laga gudbo nidaamka ah in dadku ay ka baxaan guryahooda oo ay u gacan galaan xiriiryada ka faa'iideysiga si ay u helaan gargaar.

## Faquuqa iyo ka saarida waxay u baahan yihiin nidaam ballaaran oo leh feejignaan iyo xoog saarid.

Jawaab-celinta 2022-23 ayaa si weyn diiradda loogu saaray caqabadaha ah in dadka la takooro oo laga saaro oo loo diido helitaanka gargaarka. Wada-hadallada ku saabsan arrimaha bulshada iyo siyaasadda ee horseedka u noqda wax isku diidista ama iska saarista waxay noqdeen kuwo aan ceeb loo arkin, oo hindisayaasha qaarkood ayaa si guul leh loo soo saaray. Tusaale ahaan, wax-ka-beddelka lagu sameeyay qiimaynta iyo beegsiga hab ujeedo weyn leh waxaa ka mid ah kooxaha la haybsooco, taageeridda ururada ay hoggaamiyaan dadka laga tirada badan yahay, u fiirsashada luqadaha laga tirada badan yahay, hababka isla xisaabtanka, iyo dadaallada diiradda lagu saarayo dadka laga tirada badan yahay xilliga shaqaalaysiinta. Si kastaba ha ahaatee, arrinta waxaa inta badan loo xilsaaraa kooxda ilaalinta, ama waxaa loo arkaa arrin horumarineed, halkii loo arki lahaa arrin mudnaanteeda leh oo ku salaysan nidaam ballaaran. Nidaamka gargaarka bini'aadminimo weli ma ahan mid u diyaarsan in uu kula xisaabtamo doorkiisa gaarka ah ee sii wadista takoorida. Gargaarka laftiisu waa mid ka mid ah waxyaabaha keeno takoorka taasina waxay la macno tahay in gargaarku uu kordhin doono khatarta mustaqbalka ilaa in wax badan laga qabto dhibaatada ma ogiye.

## Gargaarka caalamiga ah ayaa weli si dhib leh ugu dhex milman dhaqaalaha siyaasadda halkaas oo lunsiga gargaarka ay tahay mid nidaamsan oo baahsan.

Walaac daran oo ku saabsan musuqmaasuqa iyo lunsiga gargaarka ayaa mar kale ka soo muuqday casharradii ka dhashay jawaab celinta bini'aadantinimo ee 2022-23. Khatarta sumcadda leh ee hay'adaha gargaarku waxay abuuraan damac ah inay u beddelaan la xisaabtanka dadka kale, gaar ahaan hay'adaha iyo shakhsiyaadka Soomaaliyeed sida maareeyayaal awood mamuul leh. Beesha caalamka iyo dowladda Soomaaliya waxay u baahan yihiin inay aqoonsadaan lunsiga gargaarka inay tahay dhibaato joogto ah oo isku dubaridan, oo ay ku lug leeyihiin dhammaan howl wadeenada oo dhan. Haddii aan la rabin in la aqbalo tan, waxaa jirta khatar ah in dhayalsiga howsha ay noqon doonto mid aad u fudud oo waqti gaaban ah si ay isbeddel macno leh ugu samayso dhibaatadan adag. Tani waxay u baahan doontaa go'aan kaas oo si adag loogu eegaayo howlaha ka soocdo gudaha hay'adaha caalamiga ah iyo wajahaad joogto ah, nidaamsan oo iskaashi ku dhisan oo ay ku lug leeyihiin shaqaalaha maxalliga, kuwa dalka, iyo kuwa caalamiga ah. Tan la'aanteed dhaqaalaha gargaarku wuxuu sii wadi doonaa inuu keeno lunsiga taas oo sii xumeeyneeysa takoorka iyo khatarta wiiqaysa adkeysiga dadka ee dhibaatooyinka mustaqbalka. Si wax ku ool ah wax kaga qabashada lunsiga ayaa sidaas darteed muhiim u ah in gargaarka uu noqdo mid waxyeelladiisa yartahay oo si weyn u awoodo inuu taageero u adkeysiga dhibaatooyinka mustaqbalka.

## Ilaalinta iyo fidinta joogitaanka hawlgalka ee meelaha ay adagtahay in la gaaro waxay u baahan tahay go'naan la joogteeyay kaas oo lagu dhisayo iskaashiga.

Qaar badan oo ka mid ah kuwa ugu baahida badan ayaa ku sugan meelaha gargaarka bini'aadantinimo ay adag tahay in la gaarsiiyo, gaar ahaan meelaha ay maamusho Al-Shabaab. Qaybaha bulshada ee la takooro waxay ku urursan yihiin oo ku noolyihiin meelahan, taas oo sii kordhinaysa baylahdooda. Goobahan ay adagtahay in la gaaro ayaa sidoo kale leh khatarta ugu sareysa ee amniga iyo sumcadda shaqaalaha gargaarka ee ka shaqeeya Soomaaliya. Shaqaalaha bini'aadantinimada ayaa ku dhibtooday inay joogteeyaan maalgelinta awoodaha gorgortanka, xirfadaha iyo waayo-aragnimada looga baahan yahay inay ka shaqeeyaan meelaha ay adagtahay in la gaadho.

Si kastaba ha ahaatee, jawaab-celinta 2022–23 waxay keentay hormar muuqda oo ay sameeyeen hay'adaha gargaarka maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah si ay uga shaqeeyaan meelaha ay adag tahay in la gaaro, ayaga oo ay taageereeyso dawladaha deeqaha bixiya kuwaas oo qaatay khataro yara sareeya. Cashar muhiim ah ayaa ahaa in ka shaqaynta meelaha ay adagtahay in la gaaro ayada oo loo maraayo dhex dhexaadiyaasha in ay u baahan tahay wakhti, karti dhis iyo, tan ugu muhiimsan oo ah, kalsoonida. Kalsoonidan laguma dhisi karo bilo yar gudaheed bilowga dhibaatada sidaa darteed waxay u baahantahay dadaal dheeri ah si loo joogteeyo joogitaan hawleed inta u dhaxaysa xasaradaha ama dhibaatoyinka.

Hay'adaha gargaarku waxa ay u baahan yihiin in ay dhisaan barnaamijyo habeysan oo taageeraya fursadaha isu-socodka badan ee gelitaanka iyo ka bixidda meelaha ay adagtahay in la gaadho, iyo in ay ka faa'iidaystaan shabakadaha bulshada si ay u fududeeyaan xeeladaha dhaqdhaqaaqa.

## Nidaamka bini'aadantinimo wuxuu u baahan yahay inuu la qabsado macluumaadka iyo qalabyada falanqaynta si hab wax ku ool ah ay oola qabsadaan xaaladda isbedelaysa.

Nidaamyada macluumadka bani'aadamnimada ee muhiimka ah ee loo isticmaalo falanqaynta xaaladaha - Waaxda Falanqaynta Cunada iyo Nafaqada (FSNAU) iyo Kala-saarista Marxaladda Isku-dhafan (IPC) (IPC) – ayaa isbeddel ku sameeyey wax aad u yar 10kii sano ee ugu dambeeyay. Xilligan xaadirka ah nidaamyada macluumaadka bani'aadamnimada oo aad u yar ayaa si ku filan u tixgelinaya isbadalka socda ee bulshada Soomaaliyeed ama nidaamka awoodaha u adkeysiga. Tusaale ahaan, qaybaha hab-nololeedka ee xoolo-dhaqashada, beerashada dalagyada iyo dhaqashada xoolaha iyo ku beerashada beeraha/webgiga agagaarkiisa ayaa wali ugu sarreeyaan falanqaynta bini'aadantinimo oo aan si ku filan loo tixgalin kala-duwanaanshaha hab-nololeedyada oo ku xidhan kororka magaalooyinka iyo isku xidhka miyiga iyo magaalada.

In kasta oo xoogaa horumar ah laga sameeyay, haddana ma jirto hadaf diiradda saaran oo ku filan oo lagu fahmi karo darnaanta iyo baaxadda baahiyaha meelaha ay adagtahay in la gaaro. Iyo halka jawaab-celinta 2022-23 ay soo martay qaar ka mid ah tillaabooyinka ugu horreeya ee la-qabsiga iyo samaynta nidaamyada kormeeraya takooridda oo ku daraya caddaynta falanqaynta bani'aadamnimada ee ballaaran, tani wali ma lahan guud ahaan macluumaadka deeganka.

## Jawaab-celinta gargaarku waa in lagu aaddiyaa xilliga aanay jirin xasillooni ee rabshadaha iyo iskahorimaadyada, taas oo ay u badan tahay inay sii jirto in muddo ah.

Waxaa jiray sare u kac muuqda oo ka dhashay heerarka iska horimaadyada kaasoo saameyn muhiim ah ku leh wax ka qabashada gargaarka. Abaabulka maleeshiyo beeleedka iyo dib u gurashada Al-Shabaab ee deegaanada qaar ayaa keentay in ay soo cusboonaadaan dagaal beeleedyo salka ku haya daaqa iyo biyaha oo meelaha qaar ka taagan. Dhaqdhaqaaqyada noocan oo kale ah waxay gacan ka geysan karaan barakac kale, waxay carqaladayn karaan ganacsiga, waxayna caqabad ku noqon karaan gargaarka bini'aadantinimo, waxayna keeni karaan cabsigalinta waxyeellada dadka rayidka ah. Hay'adaha gargaarka waxay u baahan doonaan inay hubiyaan in dhaqaalahooda aan loo isticmaalin balaarinta dhulalka ee koox kasta, sidii horay u dhacday. Dib u soo qabsashada dhulka ay wado dowladda Soomaaliya ayaa keeni karta in si weyn gargaar loo gaarsiiyo goobihii markii hore aan la gaari karin sababo la xiriira gacan ku heynta Al-Shabaab, balse tani waa mid cakiran iyadoo loo baahan yahay in la ilaaliyo dhexdhexaadnimada la dareemayo, lagana fogaado in siyaasad loo adeegsado gargaarka bini'aadantinimo.

## Koox xooggan oo isugu jirta dowladda Soomaaliya, bulshada rayidka qaranka iyo awoodaha laamaha gaarka loo leeyahay ayaa soo if baxay, taasoo u baahan in si wanaagsan loogu xisaabtamo ka jawaab-celinta bani'aadamnimada.

Wasaaradaha u xilsaaran gargaarka bini'aadantinimo, wasaaradaha ay khusayso iyo shaqaalaha dawlad goboleedyada iyo kuwa dawlada hooseba waxay si aad ah uga qaybqaateen iskudubaridka jawaab celinta, laakiin wali waxaa haysta caqabado ah inay dhistaan hogaankooda kuna kalsoonaadaan habkooda mabda'a ah ee maamulka bini'aadantinimada. Si kastaba ha ahaatee, hawlwadeenada dawladdu waxay dareemeen in laga takooray fikrado curinta, qorshaynta iyo istaraatiijiyada jawaab celinta. Dhankooda, ururada aan dawliga ahayn ee Soomaaliyeed waxay dareemeen in doorkoodu uu yahay mid qandaraas-hoosaad ah oo khataraha lagu wareejinayo laakiin aan la siineyn agab iyo miisaaniyad ku filan si loo hormariyo awoodaha lagu maareeynayo khataraha.

Ururada aan dawliga ahayn ee Soomaaliya waxay ku leeyihiin door muhiim ah, oo ay ku jirto in la gaaro meelaha ay adagtahay in la gaaro. In kasta oo ay jiraan dadaallo ammaan mudan oo ay sameeyeen hay'adaha aan dawliga ahayn ee Soomaaliyeed iyo kooxahooda xiriirinta, haddana ururrada aan dawliga ahayn ee maxalliga ah ayaa weli lala xiriirinayaa daacadnimo iyo isla xisaabtan la'aan, oo ay wadaan hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa Soomaalida labadaba. Hogaamiyayaasha ururada iyo shabakadaha aan dawliga ahayn ee Soomaaliyeed oo taageero ka helaya ururada caalamiga ah, waa in ay sare u qaadaan dadaallada lagu dhisayo kalsooni oo ay muujiyaan in ay horumar ka sameynayaan isla xisaabtanka iyo daacadnimada muhiimka u ah aasaasidda door iskaashi oo buuxda ee dhinaca gargaarka bani'aadamnimada.

Ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo qurbajoogta ayaa loo arkayay inay sidii horay looga bartay ay si degdeg ah uga jawaabeen. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira khalkhal fahan oo weyn oo u dhexeeya ganacsiga gaarka ah iyo gargaarka bini'aadantinimo ee bulshada kaas oo u baahnaan lahaa in la isku xidho si wada shaqayn buuxda ay u suurtogasho.

## Meelaha waxqabadka laga sameeynaayo

Guusha lagaga hortagay macluusha baahsan ee ka jirta Soomaaliya intii lagu jiray musiibadii 2022–23 waa in si sax ah loo xusaa. Laakin waxa ay sidoo kale soo bandhigaysaa waqti muhiim u ah bulshada gargaarka caalamiga ah, taas oo u baahan in ay ka fiirsato oo ay wax ka qabato xaddidaadaha horumarinta iyo ka jawaab-celinta bini'aadantinimada, iyo in la dhiso habab cusub oo rajo leh iyo xoojinta awoodaha Soomaalida ka hor intaysan dhicin dhibaatada xigta.

Waxaa jirta baahi loo qabo in si qoto dheer dib looga fakaro sida gargaarku uga jawaabi karo barakaca, taas oo hadda xoojinaysa lunsiga iyo hayb sooca, mana taageereyso istiraatiijiyadaha adkeysiga ee bulshada. Wadashaqeyn weyn oo ka dhexeysa hababka bini'aadantinimo, xalal waara iyo adkeysiga ayaa loo baahan yahay – iyo sidoo kale la qabsiga hababka qiimaynta, beegsiga iyo qaybinta – si si wanaagsan loogu taageero dhaqdhaqaaqa iyo shabakadaha bulshada.

Siyaabaha ay gargaarku ku noqdeen kuwo si dhib leh ugu dhex milmay dhaqaala siyaasadeed ee ka faa'iidaysiga leh taasoo horseedaysa in la leexsado kheyraadka, musuqmaasuqa iyo taroorka ayaa u baahan in si cad wax looga qabto. Marka ay sidaas samaynayaan, hawl-wadeennada gargaarku waxa ay u baahan yihiin in ay baaraan nidaamkooda oo ay la shaqeeyaan shaqaalaha maxalliga ah oo ay ku dhistaan horumar wanaagsan oo laga gaaro dadaallada wax looga qabanayo takoorka. Falanqaynta xooggan ee khataraha cusub ee ka dhalanaya isbeddelka dhaqdhaqaaqa isku dhaca waa in ay ka caawisaa hawl-wadeennada gargaarka sida ay u sii dhisan lahaayeen oo ay u sii joogteyn lahaayeen dadaallada cusub ee gargaar lagu gaarsiinayo dadka ku nool meelaha aay adagtahay in la gaaro.

Awoodaha sii kordhaya ee muhiimka ah ee dawladda Soomaaliya, bulshada rayidka ah iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa bilaabaya in si wanaagsan loo aqoonsado lagana qeyb geliyo howlaha laakiin waxaa inta badan laga fogeeyaaa doorarka muhiimka ah ee istiraatijiyadda, qorsheynta qaabeynta iyo hirgelinta jawaab celinta bini'aadantinimada. Iyadoo hawl-wadeennada gargaarku ay casharro ka baranayaan ka jawaab-celinta dhibaatooyinka 2022 iyo 2023, waa in si fiican loo taageeraa adkeysiga sii kordhaya ee dadka Soomaaliyeed marka ay wajahayaan dhibaatooyinka iyo awoodaha Soomaalida ee hoggaaminta jawaabaha gargaarka.

Casharrada ka soo baxaya jawaab-celinta Soomaaliya ee ku saabsan sida loo joogteyn karo gelitaanka meelaha ay adagtahay in la gaaro, in la helo habab si wanaagsan loogu taageero kooxaha la haybsooco iyo baahida loo qabo in dib looga fikiro hababka loo waajahayowajahayo barakaca iyo lunsiga ayaa sidoo kale gacan ka geysan karta in lagu wargeliyo siyaasadda bini'aadantinimada caalamiga ah iyo ka jawaabista dhibaatooyinka kale.



# Warbixinta Kooban: Awoodaha Soomaalida ee wax ka qabashada dhibaatooyinka ayaa isbedelaysa; sidee bay uga jawaabayaan hawlwadeenada bini’aadantinimo?

Peter Hailey, Irina Mosel, Daniel Maxwell, Nisar Majid, Khaliif Cabdullaahi, Guhad Aden, Shamsa Hasan, Partha Moman, Patricia Sampedro, Nancy Balfour

Oktoobar 2023

United Kingdom Humanitarian Innovation Hub

UKaid from the British people

Humanitarian Outcomes